



FAMILY SERVICES OTTAWA
SERVICES À LA FAMILLE OTTAWA

Fahanka RESP-ga

QOYSASKA DAKHLIGOODU HOOSEEYO



Waa maxay RESP?

Qorshaha Kaydinta Waxbarashada Duwaan Gashan (Registered Education Savings Plan, RESP) waxaa weeye qorshe dawladu ay duwaan gelisay oo kaa caawinaya inaad u kaydiso waxbarashada dugsiga sare kadib ee ilmahaaga.

RESP waxa kamid noqon kara noocyada kala duwan ee kaydinta sida xisaabta kaydinta, Shahaadada Maalgelinta La Damaanad Qaaday (Guaranteed Investment Certificate, GIC) ama maalgelino. Waxa aad samaysan kartaa RESP si aad ugu faa'idayso hal ilme, ama qorshe qoys si markaa uu isticmaali karo wax ka badan hal ilme lacagta uu ku dhiganayo waxbarashada dugsiga sare kadib.



Waa maxay sababta RESP loo samaysanayo?

Kharashka waxbarashada dugsiga sare kadib sanad kasta wuu kordhaa. **Dawlada Canada waxa ay ku dartaa lacag xisaabta RESP si ay kaaga caawiso inaad u kaydiso laca waxbarashada ilmahaaga.**

Deeqda U Kaydinta Waxbarashada Canada ee Aas Aasiga ah (Basic Canada Education Savings Grant, CESC) waxaa weeye lacag Dawlada Canada ay ku dari doonto ilaa 20% xisaabtaada RESP, ilaa \$500 sanadkii. Tusaale ahaan, waxa aad ku kaydsanaysaa \$500 RESP mudo hal sano ah, CESC waxay ku dari doontaa \$100 xisaabtaada. Hadii aad ku kaydsato \$750 RESP, CESC waxay ku dari doontaa \$150 xisaabtaada.

GUNOOYINKA QOYSASKA DAKHLIGOODU HOOSEEYO

- **Qoysaska dakhligoodu hooseeyo (oo dakhligoodu ka hooseeyo \$49,020 2021) waxa ay heli karaan 20% dheeraad ah ilaa \$100 sanadkii.** Hadii aad ku kaydiso \$500 RESP waxa CESC ay ku dari doontaa \$100 xisaabtaada oo waxa aad u qalantaa \$100 oo dheeraad ah. Tani waxa ka dhigan tahay in hadii aad kaydiso \$500 hal sano ay noqonayso kaydka RESP \$700, sidoo kale wixii ribo ama dakhli ah ee xisaabtaada kaydka ama maalgelinta.
- Qoysaska dakhligoodu hooseeyo sidoo kale waxay ka faa'idaan Daymaha Iibka ah ee Waxbarashada ee Canada (Canada Learning Bond). Waxa aad heli doontaa lacag xataa hadii aanad ku darin lacag xisaabtaada RESP. **Daymaha iibka ah waxay bixiyaan \$500 sanadka kowaad, oo kadibna waxay bixiyaan \$100 sanad kasta dhalasahda ilmaha ilaa inta uu gaadhayo 15 jir.** Heerka dhakhliga waxa uu ku xidhan yahay cabirka qoyska oo waxaa laga helayaa websaytka Hormarka Shaqada iyo Shaqaalaha Canada.

SIDEE AYAAN U FURANAYAA XISAABTA RESP?

Waxa aan ku furan kartaa RESP bangiga ama shirkada adeegyada dhaqaale ee kale. Waxa aad ka eegtaa daabacaada wixii khidmado ah oo waxa aad fahantaa kharashaadka hormarinta ama waxa isbadalaha iman doona hadii aad u baahan tahay inaad kala baxdo lacag marka hore. Ilmahaagu waa inuu haystaa Lambarka Caymiska Bulshada (Social Insurance Number, SIN). Qof kasta ayaa furan kara RESP - waalidka, ayayda ama awowga, iyo xubnaha aan qoyska ahayn.





MAXAA LOO ISTICMAALI KARAA LACAGTA RESP?

Lacagta RESP waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo **barnaamijyada tobobarka, dugsiga ganacsiga, kuuliyada iyo jaamacada.**

SIDEE AYAY WAX NOQONAYAAN HADII AANU GELIN ILMAHAYGU WAXBARASHADA DUGSIGA SARE KADIB? MIYAAN WAAYAYAA LACAGTAYDA?

- Hadii aanu ilmahaagu gelin waxbarashada dugsiga sare kadib, **waxa ay kuugu jiraysaa lacagtaada RESP si aad u eegto hadii uu is badalo.**
- **Waxa aad sidoo kale lacagta CESG u wareejin kartaa ilmo kale.**
- **CESG waa in la gudaahadii aan loo isticmaalin waxbarasho, laakiin waxa aad heleysaa lacagtii aad adigu bixisay.** Waa inaad ka bixisaa cashuurta lacagta aad kala baxday laakiin waxa aad ku kaydsan kartaa Qorshaha Kaydinta Hawlgabka Duwaan Gashan (Registered Retirement Savings Plan, RRSP) laftaadu hawlgabkaaga, taas oo keeneysa in aan cashuur lagaa qaadin aad bixin lahayd.

MIYAAN AWOODAA INAAD LACAG KU KAYDSADO RESP!

Marka laga fikiro in waxaas oo sanado ah in lacag la dhigo waxaa laga yaabaa inay keento in lala dawakho. **In xataa lagu daro \$5 todobaadkii ayaa badata oo dawladuna waxay ku dari doontaa lacag xisaabta.** Waxa aad isku daydaa inaad qoyskaaga iyo asxaabtaada aad u sheegtey inay lacagta ay ku bixinayaan dhalashada iyo ciidaha inay yareeyaan oo ay ku diraan waxoogaa RESP. Waxaa weeye hadiyad sanado badan soconaysa! **Xasuusnow, xataa hadii aanad ku dari karin RESP sanad kasa, waxa aad weli heli karaa Daynta Waxbarashada ee Canada, kaliya waa inaad samaysato xisaab RESP ah.**

KA WARAN DAYNTA ARDAYGA?

Waa dhab in ilmahaagu uu u qalmi karo daynta ardayga iyo deeq uu ka helo **Barnaamijka Kaalmada Ardayga Ontario (Ontario Student Assistance Program, OSAP)** marka ay dhiganayaan waxbarashada dugsiga sare kadib. Laakiin, OSAP looguma talo gelin in lagu bixyo 100% kharashka oo ardayda / qoysaska waxaa looga fadhiiyaa inay wax bixiyaan kharashkooda waxbarashada. Kaydka RESP waxaa loo adeegsan karaa intii qoysku bixinayay.

*This program is funded by the Government of Canada and Women and Gender Equality Canada (WAGE) through the Canadian Women's Foundation.

